Baaritaanka Caruurnimada Hore



Sannadada ugu horreya ee caruurnimada laga bilaabo dhalashada illaa da'da dugiyada barbaarinta waa waqti muhiim ah oo ilmuhu dhakhso u koro waxna u barto.

Baaritaanka Hore ee Caruunimada (Early Childhood Screening) waa baaris gaaban iyo fudud ee lagu egaayo sida ilmahaagu uu u korayo iyo horumarka uu u samaynayo.

Inta u dhaxeysa da'da 3 iyo 4, bariistu waxa ay sheegi kartaa haddii ay jiraan dhibaatoyin la xariira caafimaadka ama waxbarashada, si markaasi caruurta loo siiyo caawimo inta aysan dugsiga bilaabin.

Diyaar...Bilow...Koritaan!

Minnesota Department of Education

Miyaan sugaa ilaa uu ilmuhu ka galayo dugsiga xanaanada caruurta?

Maya, inaad ka hormato ayaa fiican! Marka aad sugtid illaa uu aado dusiga waxay noqonayaan in aad wax badan la sugtay. Haddii ilmahaagu uu jiro da'da u dhaxeysa **3 iyo 4**, wac dugsiga degmadaada oo weydiiso waxa ku saabsan **Baaritaanka Caruurnimada Hore***.

*Baaritaanka caafimaadka iyo korriimada ee Head Start, Baarista Caafimaadka ee Caruurta iyo Dhalinyarada ama bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa dhici karta in ay qanciyaan waxa dugsiga looga baahanyahay.

Halka labu baarayo ilmahaaga, xirfad yaqaan khibrad leh ayaa baari doona**

- **Aragga**
- **Maqalka**
- **Dhererka & Culayska**
- **Xaaladda (cirbadaha) tallaalkooda**
- **Murqaha Waaweyn & Yaryar**
- **Xirfadaha Fahamka, Luqadda & Wada-xariiridda**
- **Bulshanimada & Horumarka Dareenka**

** Dugsiyada degmada qaarkood waxey kaloo bixiyaan baaritaanno dheeraarad ah, oo ka mid yihiiin dib uu baarista ilkaha iyo nafaqada.

Ilmahaygu ma u baahanyahay Baaritaanka Caruunimada Hore?

Akhbaarta ilmahaaga ee la xariirta Baaritaanka Caruunimada Hore waxa ay muhiim u tahay horumarkiisa/horumakeeda waxbarashada. Baaritaanka ka dib, waxa aad ogaanaysaa sida uu ilmahaagu uu u korayo, u horumarayo iyo wax u baranayo.

Si uu ilmahaagu u billabo dugsiga guud ee xanaanada caruurta ee gobolka Minnesota, waxaa lagaa rabaa inaad dugsigaaga u gudbisid **Baaritaankiisa Caruurnimada Hore oo Kooban** iyo **Macluumaadka Tallaalka**.

Ma lacagbaa la i weydiin?

Baaritaanka Caruurnimada Hore waa **LACAGLA'AAN!**

Diyaar...Bilow...Koritaan!

Kaarkan u isticmaal si aad ilmahaagu ugu diyaarisid ballanta Baariitaanka Carruurnimada Hore.

Diyaar...Bilow...Koritaan!

Sidee ilmahayga ugu diyaariyaa baaritaanka?

Diiwaan gali waxaad ku aragtid korriimada ilmahaaga iyo horumarka kuna qor wixii su'aala ah ama wixii walaac ah oo aad ka qabtid.

Waxyaabaha ay ilmahaayga ku fiican yahay:

SU'AALAHA
Aan ka qabo waxa ku saabsan caafimaadka ilmahayga:

Aan ka qabo korriimada ilmahayga:
(tusaale, waxbarashada, socodka ama hadalka)

Xaggey ku taallaa rugta iigu dhow ee Baaritaanka Caruurnimada Hore?

La xariir dugsiga degmadaada:

Ama **raadso rugta baaritaanka ee kuugu dhow** adiga oo galaya internetka:
MNParentsKnow.info
iyo raadso "Find a Program".

Kama aadan helin akhbaarta aad raadinaysay?
Wac 651-582-8412

Diyaar...Bilow...Koritaan!

SU'AALAHA
Aan ka qabo maqalka iy aragga ilmahayga:

Su'aalaha kale ee aan qabo:

Maxay tahay akhbaarta kale ee loo bahaanyahay?

La imow akhbaarta ku saabsan ilmahaaga daryeelihiisa caafimaadka, dhakhtarka ilmaha iyo magacyada rugyada/isbitaallada iyo telefoonnadooda.

Iska hubso in aad horay u soo qaadid Macluumaadka Tallaalka ee ilmahaaga (tallaalka iyo cirbadaha) marka laguu qabto ballanta Baaritaanka Caruurnimada Hore.

Diyaar...Bilow...Koritaan!

Minnesota Department of Education